




Susun/Aqmarka Ariga

Cudur aan u gudbin dadka ahna in la wargeliyo dhaqatiirta xoolaha

Xoolaho oo ku dhaco Cudur Keenaha


| | |
|---|--|
| <ul style="list-style-type: none"> Idaha Riyaha | <ul style="list-style-type: none"> <u>Macluumaad guud</u>: Cudurka Susunka/Aqmarka arigas, sidoo kale loo yaqaan « daacuunka idaha iyo riyaha” waa cudur fayras oo aad u faafa oo ku dhaca idaha iyo riyaha <u>Feyraaska</u> : waa Xubin ka mid ah duulka <i>Morbilliviru</i> ee qoyska <i>Paramyxoviridae</i>, si liidata uma adkeysan karo jawiga bannaanka <u>Muddada kal huuriska</u> : 3 ilaa 6 maalmood |
|---|--|

Astamaha / Calaamadaha Cudurka Gudbinta

| | | |
|--|--|---|
| <ul style="list-style-type: none"> Xummad aad u sarreysa Gangan ku jabsan neefka (ama cadar) Dareere indhaha (👁️ 1), sanko (👁️ 2) iyo afka ka yimada, marka hore iska cad kaddibna malax noqda Shuban daran, mararka qaar na dhiig la socda (👁️ 3) Neef qabatow iyo qufac Dhaawacyo afka ah (👁️ 4), daaqa u joojiya neefku Duleellada sanko oo dillaaca oo na qallalan dhicis Dhimasho deg deg ah (5 – 10 maalmood gudahood) | <p style="text-align: center;">Baarista dhimasho kaddib</p> <ul style="list-style-type: none"> Dhiig bax sambabeed (👁️ 5) Xiidanka wayn oo lagu arko xarijin casaan ah (👁️ 6) | <ul style="list-style-type: none"> <u>Si toos ah</u> : Istaabashada ama adoo u dhowaada neef buka iyo/ama qaadashada dheecaan wasaqaysan ama wax kasta oo ka yimid neefka buka <u>Si aan toos ahayn</u> : farsamo ahaan (qashin, cunno, dhar, qalab)  |
|--|--|---|

Saamballada Daaweynta

| | | |
|--|--|--|
| <ul style="list-style-type: none"> <u>Xayawaanka oo nool</u> : dhiig leh dawada xinjirowga lidka ku ah (Vacutainer 5ml), indhaha afka iyo/ sanko laga qado swab iama dhiiga cad | <ul style="list-style-type: none"> <u>Baarista dhimashada kaddib</u> : saamballo laga qaaday gumudka limfiga, sambabada, mindhicirka, beer yaraha | <ul style="list-style-type: none"> Ma leh daawo u gaar ah aan ka ahayn in la daaweeyo calaamadahiisa Baqtiga Xayawaannada dhintay,iyo haraga ilmaha dhiciska waa in god dheer lagu aaso lana burburiyo iyadoo la isticmaalayo kiimikada <i>quicklime</i> |
|--|--|--|



Talooyin gaas ah iyo talaabooyin la qaadayo haddii u dilaaco cudurka Susunka/Aqmarka Ariga

Loogu talagalay daryeelayaasha caafimaadka xoolaha:

- Kormeer dhammaan xoolaha oo haysto beeraleyda adoo ka eegaya dheecaan ka socda isha, sanko iyo afka, niyad-jab daran iyo shuban daran;
- Kormeer xoolaha labo mar maalintii ilaa 7 maalmood laga gaaro;
- Duug xoolaha dhintay iyo haraaga dhiciskasoo dhacay ilaa labo mitir adigoo isticmaalaya kiimikada *quicklime*.

Loogu talagalay kalkaaliyeyaasha dhakhaatiirta xoolaha:

- Ku xaree xoolaha xero una dhis derbi ay ku jiraan
- Kormeer goobaha lagu gawraco laguna burburiyo baqtiga xoolaha dhintay iyo haraaga dhicisga soo dhacay.

Loogu talagalay dhaqaatiirta xoolaha gaarka ah iyo/ama kuwa dowladda u shaqeeya

- Ku tali in la gowraco xoolaha xanuunsan (la laayo);
- Abaabul barnaamij tallaaf adigoo heshiis la galaya hay'adda caafimaad ee dalka.